Taariikhda: 12. May 2020

Macluumaadka ka socda Wasaaradda Arimaha Bulshada iyo Isdhexgala ee Hessen oo ku saabsan Coronavirus

Waxyaabaha soo socda waxaan ku siinaynaa xoogaa Macluumaad ah iyo sidoo kale tixraacyo ilo aad ka heli karto Macluumaad cusub oo ku saabsan Coronavirus.
Dhamaadkii Sanadka 2019 kii wuxuu Ururka Caafimaadka Aduunka (WHO) sheegay, in Magaalada Wuhan (Shiinaha) ka jiraan cudurro sanbabada ah oo aan la garanayn sababaha keentay. Dhowr maalmood ka dib, fayraska cusub ayaa loo aqoonday inuu yahay sababta. Waxaa la dhahaaSARS-CoV-2. Cudurka uu sababay Fayraska COVID-19 oo hadda ku faafay Adduunka oo dhan.

Waxaad ka heli doontaa Bogagga soo socda:

1. Macluumaad guud oo ku saabsan Coronavirus
2. Maxaan samayn karaa, si aan u sii caafimaad qabo? Sideen ula tacaali karaa astaamaha?
3. Macluumaadka ku saabsan waajibaadka maaskada ee Hessen
4. Macluumaadka ku saabsan masaafada loo baahanyahay ee Hessen
5. Macluumaadka loogu talagalay Dadka soo laabtay iyo kuwa socotada ah ee Hessen
6. Macluumaadka adeegyada cibaadada iyo adeegyada aaska ee Hessen
7. Macluumaadka ku saabsan raacidda Qoyska wakhtiga dhalashada iyo dhimashada ee Hessen
8. Macluumaadka daryeelka degdegga ah ee Carruurta ee Hessen

1. Macluumaadka guud

Waa sidee Xaaladdu hadda?
Machadka Robert-Koch-Institut (RKI) wuxuu si joogta ah u qiimeeyaa micnaha uu caafimaadka Dadka u leeyahay Fayraska cusub wadanka Jarmalka. Qiimeynta halista ah ee hadda jirta wuxuu RKI ku soo daabacay meeshaan

https://www.rki.de/DE/Content/InfAZ/N/Neuartiges_Coronavirus/Risikobewertung.html;jsessionid=9766CE9E961256ECB36D5D17A325E8F4.internet062.

Dowladda Hessen waxay Hessen u go‘aamisay: Si loo yareeyo faafinta Corona-Virus iyo si aysan khatar u galin Dadku, ayaa waxaa lagama maarmaan ah, in la yareeyo xiriirada shakhsiyeed ee Dadweynaha - iyo kuwa gaarka ah intii suurtagal ah. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan waajibka maaskada iyo shuruudaha masaafada waxaa laga helayaa Bogagga soo socda.

Xageen ka heli karaa Macluumaad dheeri ah, oo ku saabsan Coronavirus ee Hessen?
Macluumaadka hadda ah waxaa laga heli karaa bogga Wasaaradda Arimaha Bulshada iyo Isdhexgalka ee Hessen: www.hessenlink.de/2019ncov.

Wasaaradda Arimaha Bulshada iyo Isdhexgalka ee Hessen waxay sidoo kale u diyaarisay khad Macluumaad bilaash ah lagu helayo oo loogu talagalay Muwaadiinta Hessen.

Taleefanka Corona:	0800 555 4 666
Helitaanka:	maalin kasta laga bilaabo 8 ilaa 20 Saacadda

Wixii su’aalo ah waxay Muwaadiintu sidoo kale kala xiriiri karaan, waaxda caafimaadka ee qaabilsan. Faahfaahinta xiriirka waxaad ka helysaa halkaan: https://tools.rki.de/PLZTool/.

2. Maxaan samayn karaa, si aan u sii caafimaad qabo?

Tallaabooyinka ka hortagga ah - xataa hargabka - waa in Muwaadiinta lagu booriyo, inay u hogaansamaan xeerarkaan nadaafadda ee soo socda:

- si joogta ah oo fiican in gacmaha loo dhaqo (sidoo kale Carruurta iyo Dhalinyarada)
- qufaca iyo hindhisada kaliya xaashida sanka ama laabka suxulka (sidoo kale Carruurta iyo Dhalinyarada)
- hal-mar in la isticmaalo xaashida sanka halkaas mar kadibna in lagu tuuro qashin qubka
- inaan gacanta la isku salaamin, hab la isa siin / dhabanada la iska dhunkan
- gacmaha ha ku taaban sanka, afka iyo indhaha (khaasatan kadib markaad taabatay qabsashada Basaska ama aad isticmaashay gacanta albaabada, kuwaas oo Dad badani taabteen, laakiin sidoo kale guriga)
- Smartphone, Taleefanka gacanta, Tablet iwm. Si joogto ah loogu nadiifiyo/ jeermis dilaha
- had iyo jeer isticmaal koobabkaaga iyo maacuuntaada
- si joogto ah oga fogow Dadka badan.

Sideen ula tacaalaa astaamaha?

Haddii Muwaadiniintu dareemaan astaamo sida qufac, qandho, ama neefta oo ku adkaata waa inay:

- **wacaan 116 -117** (Lambarka taleefanka ee adeegga gurmadka degdegga ah)
- inaad khadka taleefanka kala soo xiriirto waaxda caafimaadka ee degaanka
- inaad khadka taleefanka kala xiriirto Dhakhtarkaaga guriga

Kuwaasu waxay markaas Qofka weydiinaya u kala caddaynayaan, haddii ay u badan tahay inuu hayo fayraska cusub ee Coronavirus, hadduu jiro shaki macquul ah in la bilaabayo baaritaano kale iyo daaweyn.

Macluumaad dheeraad ah oo ku qoran luqado kale waxaad ka helaysaa halkaan https://www.bundesgesundheitsministerium.de/coronavirus.html

Hadda waxaa jira Macluumaad badan oo khaldan oo lagu baahinayo warbaahinta Bulshada. Fadlan u isticmaal Macluumaadkaaga ilaha kor lagu soo xusay

3. Macluumaadka ku saabsan waajibaadka maaskada ee Hessen

Laga bilaabo 27. Abriil 2020, Muwaadiinta reer Hessen waa inay xidhaan dabool Afka-Sanka ah.

Halkee ayay tahay in lagu xidho daboolka Afka-iyo Sanka ?

- Gaadiidka Dadweynaha (Baska, Tareenka, Taksiga, Markabka iyo Diyaaradda)
- Agagaaraha Dukaamada, Bangiyada iyo Xaafiisyada Boostada iwm.
- Suuq toddobaadlaha
- Dhammaan Xarumaha daryeelka caafimaadka sida Isbitaalada iyo dhaqamada caafimaad
- Gudaha santarada wax laga iibsado iyo jidadka dukaameysiga (Wadooyinka dukaamadu waa qaybo daboolan, kuwaas oo Qolalka iibku ku yaalaan oo u adeega taraafikada macaamiisha)
- Hoolasha ciyaarta iyo Kasiinooyinka
- Qolalka xiran ee Matxafka, Qalcado iyo goobaha xasuusta iyo sidoo kale baagaga xayawaanka iyo xannaanada xoolaha
- Bixinta iyo helitaanka adeegyada la xiriira jirka (timo jaraha, daryeelka cagaha, istuudiyaha taatoo ga iwm.)
- Waajibaadka daboolka wuxuu waliba khuseeyaa shaqaalaha jikada iyo shaqaalaha adeegga inta ay shaqadooda qabanayaan.

Waa maxay daboolka Afka-Sanka?
Maasko ahaan waxaa loo xisaabinayaa dabool kasta oo Afka iyo Sanka hortiisa ah, iyadoon loo eegayn wax calaamad ah ama qaybta badbaadinta la xaqiijiyay ee ku haboon, si loo yareeyo ku faafidda qulqulyada dhibcaha wasakhaysan ama hawada, kadib qufaca, hindhisada ama hadalka. Marka lagu daro waxyaabaha loo yaqaano maaskooyinka la tolay ee maalinlaha ah, sidoo kale waxaa lagu xisaabinayaa shaalasha iyo maryaha.

Maaskada caafimaadka ee xirfadlaha, waa in loo daayo shaqaalaha caafimaadka.

Fogaanshaha masaafadu wali waa muhiim
Xayiraadaha xiriirka iyo xeerarka masaafada, loo dhaafi maayo xidhashada maaskada maalinlaha ah.

Waxa ka reeban
Waajibaadka ah in la gashado maaskada, ma khusayso Carruurta ka yar da'da 6 Sano ah iyo Dadka, aan gashan karin maaskada Afka-Sanka sababo caafimaadka ama naafanimada la xiriira awgood.

Ganaaxa
Haddii aanan maaskada la gashan waa xadgudub. Haddii aysan Muwaadiintu gashanayn maasko, oo kadibna lagala hadlay taas, walina aysan gashanin, waxaa xadgudubka soo noqnoqoshada ah lagu ganaaxi karaa lacag 50 Euro ah.

4. Macluumaadka ku saabsan shuruudaha masaafada

Joogitaanka meelaha Dadweynaha waa **la oggol yahay:**

- si wadajir ah Qof kale, oo aan kugula nooleyn Guriga
- si wadajir ah qaraabada isla Guriga ku wada nool,
- ama si wadajir ah ehelkaaga iyo reer kale.

Markaad la kulmayso Dadka kale, masaafada ugu yar ee 1,5 Mitir waa in la ilaaliyaa. Akhlaaqda Dadweynaha oo khatar gelinaya shuruudaha masaafada, sida xafladaha wadajirka ah, wada shiilidda hilibka ama bannaanfadhiga waa mamnuuc, iyadoon la eegaynin tirada Dadka.

Waxaa ka reeban:

- Gaadiidka Dadweynaha,
- raacidda iyo daryeelka Carruurta yaryar ama Dadka u baahan taageerada,
- ka qaybgalka Imtixaanada, gaar ahaan Imtixaanada Dowladda iyo Imtixaanada Shaqada,
- ku deeqida Dhiiga,
- kulamada Dadka, kuwaas oo ku khasban inay ka wada shaqeeyaan ganacsi, xirfadle, ama sababaha la xiriira daryeelka,
- Shirarka iyo dhageysiga Maxkamadda,
- haddii loo baahdo iyada oo ay jirto fasax gaar ah oo laga helo xaafiisyada, oo ku saabsan adeegyada aaska iyo aasitaanka.

5. Macluumaadka ku saabsan Dadka soo laabtay iyo kuwa socotada ah

Dadka soo laabtay iyo kuwa socotada ah: Maxaad ilaalinaysaa haddaad ka soo noqoto tusaale ahaan Fasaxa?

Si looga hortago inay dhashaan ilo cusub oo cudurka ah, oo ay sababayaan Dadka soo noqonya- ama kuwa socotada ah, laga bilaabo 10. Abriil 2020 waxaa socotada loo dejiyay guud ahaan 14 - maalmood inay karantiil ku ahaadaan Guriga. Sharciga ayaa dhigaya in Dadka ka soo jeeda Hessen, ee ka yimid dibadda ay sidoo kale ku khasban yihiin inay si dhakhso leh ula xiriiraan waaxda caafimaadka ee masuulka ka ah meesha ay degganyihiin iyo inay la socodsiiyaan soo laabashadooda. Waxaa sidoo kale waajib kugu ah, haddii aad isku aragto astaamaha cudurka COVID-19, iyadoo la eegayo shuruudaha Machadka Robert Koch-Institut, inaad si dhakhso leh ula xiriirto waaxda caafimaadka ee masuulka kaa ah.

Waxaa jira waxyaabo ka reeban kooxaha Dadka qaarkood ah- iyo kooxaha xirfadaha leh. Gaar ahaan kuwa, kuwaas oo muhiim u ah keenidda alaabada Dadka, gaadiidka rakaabka, ama kuwa muhiimka u ah daryeelka caafimaadka iyo sidoo kale howlaha gurmadka, sida saraakiisha Booliiska. Sidoo kale waxaa kamid ah, safarka ama joogitaanka gaaban ee Hessen dhexdiisa ah iyo sidoo kale dibadda. Shaqaalaha xilliyeed waa laga dhaafay nidaamyada karantiilinta xaaladaha qaarkood.

6. Macluumaadka ku saabsan adeegyada cibaadada iyo adeegyada aaska

U hoggaansanaanta masaafada- iyo Xeerarka nadaafadda ayaa suurtagal ka dhigaysa in mar kale la qabto adeegyada iyo isu imaatinka diinta. Xitaa haddii tani aysan noqon doonin qaab dhismeedkii hore ee caadiga ahaa, dadku waxay ku wada dhaqmi karaan caqiidadooda, isla markaana isugu imaan karaan casharada Rabigga. Laga bilaabo 4. Maajo, adeegyada iyo isu imaatinka diinta ayaa mar kale suurtagal noqon doonta, haddii:

- la ilaaliyo masaafada ugu yar ee 1,5 Mitir ee Dadka u dhaxaysa. (Kaliya Dadka ku wada nool hal guri ayaa laga saaray masaafada ugu yar.)
- Waxyaabaha, tusaale ahaan dambiisha aruurinta, haddii aanan la aqbalayn kadibna aan la sii gudbinayn.
- Haddii la hubinayo tallaabooyinka habboon ee nadaafadda sida diyaarinta daawada jeermiska lagu dilo.
- Intaa waxaa u dheer, Bulshooyinka diimaha waa inay si muuqata ugu soo dhejiyaan goobta kulanka, masaafada- iyo Xeerarka nadaafadda ee lagama maarmaanka ah.

Kulamada duugta iyo aaska sidoo kale waa macquul, haddii ay shuruuduhu waafaqsan yihiin qodobada kor lagu soo sheegay ee Xeerarka cibaadada.

7. Macluumaadka ku saabsan raacidda Qoyska wakhtiga dhalashada dhimashada

Laga bilaabo 28.Maarso 2020, ka reebban Xeerarka hore ee lagu dabaqi karo booqashooyinka, ayaa loo oggolaan karaa xubnaha Qoyska ugu dhow, xaaladaha qaarkood. Maamulka Xarunta, tusaale ahaan Isbitaalada, haddii kaqayb galayaasha caafimaadku u arkaan inay muhiim u tahay asluub ahaanta-iyo sababaha Bulshada, waxay awood u siinaysaa xubnaha qoyska dhow inay la socdaan khaasatan dhalashada ama geedi socodka dhimashada.

Dadka qaba infegshinada neef-mareenka way ka reeban yihiin Xeerarka reeban.

Tani waxay ka mid tahay, Xeerarka reeban ee „Qawaaniinta labaad ee lagula dagaallamayo Fayraska Corona-Virus“.

8. Macluumaadka daryeelka Carruurta:

Waxaa lagu guulaystay, in la yareeyo faafinta fayraska ee Hessen. Ujeeddadu wali waa in la ilaaliyo Dadka oo dhan, gaar ahaan Dadka da'da ah iyo kuwa horeyba u jirranaa, sida ugu wanaagsan ee suurtagalka ah. Sidaa darteed, soo bixitaanka silsilado cusub oo caabuq ah waa in laga fogaadaa intii suurtagal ah.Tallaabooyinka waxtarka leh, si taas loo gaaro, wali waxay u baahantahay in la yareeyo xiriirada shakhsiyeed. Dhammaan xayiraadaha harsan waxay raacayaan mabda'aas. Laga bilaabo 2. Juun, Xarumaha xanaanoo.maalmeedka aya dib loo furi doonaa, howlo joogto ah oo xaddidan. Daryeelka Carruurta ee lagama maarmaanka ah waa la sii wadi doonaa, waxaana lagu sii balaarin doonaa kooxaha kale ee u baahan, waana in tusaale ahaan, kooxaha daryeelka ay ahaadaan sida ugu yar ee suurtagalka ah sababaha difaaca infagshinka awgeed, haddii kale waxaa lumaya tallaabooyinka waxtarkooda muhiimka ah.

Qoysaska ma loo oggol yahay inay xannaaneeyaan Carruurta midba midka kale?

Haa, kala wareejinta daryeelka Carruurta ugu badnaan saddex Qoys (Beesha daryeelka Qoyska) waa la oggol yahay. Xiriirka kale ee Bulshada waa in la yareeyo intii ay suurtagal tahay.

Goorma ayaa Ilmahayga loo oggol yahay inuu ku laabto Xannaanada?

Laga bilaabo 2. Juun, xarumaha xanaano-maalmeedka ayaa dib loo furi doonaa howlo joogto ah oo xaddidan.

Goorma ayuu ilmo-xannaaneeyuhu xanaanayn karaa Ilmahayga?

Laga bilaabo 2.Juun.

Ma jiraan wax ka reeban?

haa, waxaa jira daryeelka lagama maarmaanka ah ee Carruurta oo loogu talagalay qaar ka mid ah xirfadlayaasha- iyo kooxaha shakhsiyaadka ah. Shuruudaha loogu baahanyahay daryeelka lagama maarmaanka ah ee Carruurta ayaa ah, in ilaaliyaha Sharciga ah ee Carruurta uu leeyahay mid ka mid ah waxyaabahaan soo socda

1. Ehelka wakaaladda fulinta Sharciga, Shaqaalaha Dalka ee Xarumaha Booliiska iyo kuwa fulinta howlaha

2. Ehelka waaxda dab-damiska (Shaqaale buuxa- iyo Taburucaadka), waaxaha dabka

3. Shaqaalaha maamulka caafimaadka Bulshada

4. Garsoorada iyo sidoo kale Xeer-ilaaliyaasha iyo Qareenada Cadaaladda

5. Shaqaalaha Cadaaladda- iyo fulinta Sharciga

6. Shaqaalaha adeegyada gurmadka

7. Caawiyaasha hay'adda gargaarka farsamada

8. Shaqaalaha ilaalinta musiibada

9. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka: Rugaha caafimaadka, Isbitaalada iyo Xarumaha daryeelka, iyo daryeelka bukaan-socodka iyo adeegyada kalkaalinta

10. Shaqaalaha ka shaqeeya xirfadaha caafimaadka iyo kalkaalinta, gaar ahaan

- Daryeelayaasha waayeelka

- Kaaliyeyaasha daryeelka waayeelka

- Kalkaaliyeyaasha suuxinta

- Dhakhaatiirta

- Farmashiistayaasha

- Shaqaalaha Jeermis dilayaasha ah

- Daryeelka caafimaadka iyo kalkaaliyaasha Carruurta/ Shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo kalkaaliyaasha caafimaadka

- Umulisooyinka

- Caawiyaal caafimaad

- Shaqaalaha takhasuska leh ee caafimaadka

- Caafimaad-Farsamo kaaliyeyaasha sheybaarka

- Caafimaad-Farsamo kaaliyeyaasha raajada

- Caafimaad-Farsamo kaaliyeyaasha loogu talagalay baadhitaanada shaqaynta

- Shaqaalaha gurmadka degdega ah

- Kaaliyeyaasha qalliinka

- Kalkaaliyaasha caafimaadka

- Farmasiiga-Farsamada Kaaliyeyaasha

- Kalkaaliyayaasha caafimaadka sida ku xusan § 1 des Rettungsassistentengesetzes

- Dhakhaatiirta Ilkaha

- Shaqaalaha takhasuskaleh ee Ilkaha

- Dhakhaatiirta Cilminafsiga maskaxda

Dhakhaatiirta Cilminafsige Carruurta iyo Dhalinyarada

Dhakhaatiirta Cilminafsige ee Dhalinyarada

11. Shaqaalaha ku takhasusay Xarumaha xannaano-maalmeedka sida § 25 HKJGB

11a. Shaqaalaha ku jira § 45 SGB VIII liisanka hawlgalka (qayb ahaan-) Xarumaha bukaan-jiifka, ee aan ahayn xanaano maalmeedka Carruurta

11b. Dadka, bixiya adeegyo la talin ah oo wakhti buuxa ah oo loogu talagalay daryeelka degdegga ah ee nafsaani-bulsho, gaar ahaan aagga daryeelka degdegga ah ee la talin degdeg ah ama Taleefanada dhibaatada iyo sidoo kale Shaqaalaha Xarumaha badbaadinta ee loogu talagalay Dadka ay saameeyeen rabshada ku salaysan Jinsiga, gaar ahaan hoyga Haweenka ama hoyga samatabixinta,

11c. Dadka, sameeya la tashi iyadoo la raacayo Sharciga Khilaafaadka Uurka ee xarumaha khilaafyada la aqoonsan yahay,

11d. Shaqaalaha adeega guud ee Bulshada ee lala kaashanayo hay'adaha guud ee daryeelka Carruurta iyo Dhalinyarada,

12. Dadka, si toos ah ugu lugta leh bixinta kaalmada lacageed sida ku xusan SGB II, SGB III, SGB XII, Sharciga faa'iidooyinka Magangalyo doonka, Sharciga horumarinta Waxbarashada Federaalka, Sharciga loogu talagalay kor u qaadida hormarinta xirfada iyo Sharciga kabida kirada,

13. Shaqaalaha aagagga sida ku xusan VO ee go'aaminta kaabayaasha muhiimka ah ee leh shahaado gaar ah in howshu ay khasab tahay, tusaale ahaan Shaqaalaha ka shaqeeya ganacsiga tafaariiqda cuntada, wax soo saarka beeraha iyo sidoo kale sameynta, safrinta iyo qeybinta cuntada,

14. Shaqaalaha ka shaqeeya maareynta qashinka oo wata shahaado gaar ah, oo sheegaya in mas'uulka sharciga ahi ay tahay inuu ka shaqeeyo goobta shaqada si loo ilaaliyo kaabayaasha,

15. Shaqaalaha wakhti buuxa ee saxaafadda, Raadiyaha, Telefishinka iyo Telemedia kale (oo ay la socoto caddayn loo shaqeeyaha, oo ka shaqeeya goobta shaqadu lama huraan u tahay, si loo ilaaliyo ganacsiga aasaasiga ah),

16. Askarta iyo Shaqaalaha Bundeswehr, kuwaas oo lagama maarmaan u ah in la hubiyo diyaargarowga hawlgalka iyo hawlgallada socda ee kooxda Bundeswehr,

17. Maamuleyaasha, Shaqaalaha maamulka Dugsiga ee macnaha u ah qodobka § 156 Nr. 1 ee Sharciga Dugsiga Hessen iyo Macallimiinta iyo Kormeerayaasha sida tooska ah ugu lug leh abaabulka iyo hirgelinta tilmaamaha fasalka iyo dhacdooyinka kale ee Dugsiga (sida § 3 Abs. 1 Satz 3 ilaa 5 Abs. 3 ee 2. Xeerka lagula dagaallamayo Corona-Virus),

17a. Ardayda Iskuulka iyo Ardayda Jaamacadda (Iskuulada farsamada), kuwaas oo lagu baro sida ku xusan § 3 Abs. 1 Satz 3 ilaa 5 2. Xeerka lagula dagaallamayo Corona-Virus,

18. Dadka, si muuqata ugu firfircoon cilmi baarista daawada iyo daawooyinka ee la xiriira Fayraska SARS-CoV-2-Virus,

19. Dadka, kadib xaqiijinta madaxa wakaalada, ay tahay inay ka shaqeeyaan wakaalada iyo maamulka aagaga udub dhexaadka u ah cilmi baarista dowlada iyo maamulka sayniska iyo aagaga asaasiga ah ee ilaalinta hantida dhaqanka,

20. Qareenada iyo sidoo kale Notaayada,

21. Xubnaha hay'adaha Dastuurka,

22. Wadaadada iyo nafs la taliyaha,

23. Milkiilayaasha iyo Shaqaalaha guryaha aaska,

24. Waalid kaligiis ah oo shaqeeya ama wax barta (Dadka, la nool hal Canug ama in ka badan oon qaangaar ahayn oo mas'uul ka ah daryeelkooda barbaarintooda)

Khabiirada Xarumaha xanaanada waa loo oggolyahay inay Carruurtooda, haddii ay ka soo baxaan shuruudaha ilaalinta cudurada, ku daryeela Xarunta xanaanada ee ay ka shaqeeyaan. Mamnuuca soo gelitaanka xanaanada ma khuseeyo Carruurta, kuwaas oo daryeelkooda Xarun xanaano maalmeedka ah ama xanaano maalmeedka, taas oo ay ugu wacantahay go'aanka Xaafiiska Daryeelka Dhalinyarada masuulka ka ah, si loo hubiyo wanaagga ilmaha. Carruurtaas waxaa lagu xanaanayn karaa Xanaanada ama xanaano maalmeedka Carruurta.

Hay'addu waxay codsan kartaa caddayn ah inay ka tirsan tahay kooxaha kor lagu soo xusay. Haddii shaki jiro, waxaa go'aaminaya Hay'adda masuulka ka ah.

Feejignaan: Ka reebitaankaan ma khuseeyo, haddii ilmahaagu ama xubin kamid ah isla Guriga ay:

• hayso astaamaha cudurka

• xiriir la lahaa Daka qaba cudurka ama 14 maalmood ka soo wareegeen markii lala xiriiray Dadka cudurka qaba

• (tani ma khusayso Carruurta waalidkood ay la xiriiraan Dadka cudurka qaba, sababtuna tahay hawlahooda shaqo ee daryeelka caafimaadka)

• laga bilaabo 10. April 2020 Dadka, Dhulka-, Badda- ama Hawawada oga yimid Waddan ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka ee Jarmalka,

• horey u joogay aagga ay kahor Taariikhda 10. Abriil 2020 Machadka Robert Koch-Institut ku tilmaamay aag khatar u ah Fayraska SARS-CoV-2-Virus, oo soo galay dalka kadib markii lagu qeexay aag halis ah ama

• 14 maalmood gudahood, ka hor, ka soo galeen aagagga lagu qeexay inay kamid yihiin aaggga khatar ah.

Tani waxay khusaysaa muddo 14 maalmood ah ka dib soo galitaanka. Waalidiinta, kuwaas oo Carruurtooda ku daryeela xannaanada malintii ah ama Xarun xannaano maalmeed, in kasta oo ka reebitaankoodu aanu khuseyn iyaga ama halka shuruudaha ilaalinta caabuqa aan la buuxin, waxay u dhaqmayaan si aan habbooneyn.